

**Magaalada iyo Degmada Denver oo Bandhigay Wararkii ugu Dambeeyay ku saabsan Gurmada COVID-19**  
*Isbeddelka ku aaddan isticmaalka beeraha nasashada iyo garoomada golf-ka, hooy cusub oo kaalmaati ah, gargaarka ganacsiyada iyo fannaaniinta*

**DENVER** – Duqa magaalada Michael B. Hancock ayaa maanta ku dhawaaqay dhowr isbeddel oo ku saabsan gurmada Denver ee COVID-19, isagoo hoosta ka xariiqay baahida loo qabo in lagu sii jiro guryaha isla markaana bannaanka si mas'uuliyad leh loogu hawl fushado. Duqa Magaalada iyo Xarunta Gurmada Degdegga ah ayaa waxa ay billaabeen qorsheynta dadaallada soo kabashada, laakiin kala fogaanshaha dadka ayaa hadda weli ah aaladda ugu waxtarka badan ee lagu xaddido faafidda fayraska.

Magaalada ayaa si dhow la shaqeyn doontaa Governor Polis iyo kuwo kale si loo go'aamiyo in xogta daryeelka caafimaad ee aanu aragno ay saamaxeyso in si weji weji ah lagu dabciyo amarka joogista-guriga. U gudubka qorshaha dib u soo kabashada waxa uu saameyn ku yeelan doonaa isu imaatinka dadka badan, dadka deegaanka, iyo dib-u-furitaanka ganacsiyada.

Magaalada waxa ay taageero siineysaa dadka ay la soo daristay hooy la'aan; waxa ay gargaar u fidineysa dadka deegaanka ah iyo ganacsiyada, oo ay ku jiraan in ka badan \$ 2 milyan oo loogu talagalay ganacsatada maxalliga ah iyo suugaan yahaannada; iyo dib-u-furista garoomada golf-yada dadweynaha Abril 22 oo ay la socdaan tallaabooyinka badqabka oo cusub. In badan oo xannibaadyo ayaa wali sii jiri doona. Bulshada waa in ay fisho in amarrada caafimaadka dadweynaha ee magaalada ee daboolaya xayiraadda kulamada waaweyn iyo munaasabadaha, oo horey loo qorsheeyay in ay dhacdo Maajo 11, in muddada loo kordhin doono dhammaadka toddobaadkan illaa taariikhda la go'aamiyo.

"Nalka hal mar uun ma shideyno. Tani waxa ay noqon doontaa mid aanu si tartiib ah u shideyno iyada oo tallaabooyinka badan oo badbaadada ah oo hadda jira sii jiri doonaan ilaa aanu si wanaagsan u xakameyno faafidda COVID-19," ayuu yiri Duqa Magaalada ee Hancock. "Mahadsanid ayaan leeyahay qof walba oo guriga iska joogey dhammaadka toddobaadkan – waxa aad gacan ka geysatay badbaadinta qof noloshiisa, laga yaabee naftaada."

**Isticmaalka Beeraha Nasashada iyo Furitaanka Garoomada Golf-ka:** Beeraha Nasashada Denver iyo goobaha Madadaalada waxa ay soo bandhigayaan macluumaad dheeri ah oo la xiriira howlaha ka socda beeraha nasashada ee Denver si loo joogteeyo kala fogaanshaha dadka isla markaana loo xoojiyo caafimaadka iyo fayo-qabka dadka booqanaya beeraha nasashada:

- Ha isku soo uruurina ama ku safrin koox ahaan
- Ciyaaraha iyo hawlaha kooxeedka ah waa mamnuuc
- Wadaagista qalabka lama oggola (sida, frisbee, kubadda, iwm,)

Garoomada golf-ka oo ay maamusho magaalada ayaa dib loo furi doonaa Arbaco, 22 Abriil, haddii cimmiladu ay saamaxdo, iyada oo xaddidaad la dhaqan-gelin doono si loo hubiyo kala fogaanshaha dadka. Macluumaad faahfahsan waxa aad ka heli kartaa [www.cityofdenvergolf.com](http://www.cityofdenvergolf.com).

**Sanduuqa Gargaarka Ganacsiyada:** Horumarinta Dhaqaalaha iyo Fursadda ee Denver & Fursad ayaa maanta bilaabi doontaa in ay fidiso deeq bilow ah oo gaaraya \$ 2 milyan oo lagu taageeraayo qaar badan oo ka mid ah ganacsatada yaryar ee ugu nugul ee Denver. Qiyaastii boqolkiiba 60 ee shirkadaha helaya gargaarka waxaa leh haween- iyo /ama dadka laga tiro badan yahay.

**Sanduuqa Gargaarka Fannaaniinta ee Colorado:** Denver Arts & Venues waxa ay caawineysa fannaaniin shakhsi ah oo ay saameysay xayiraadaha la dhaqan-galiyay sababo la xiriira cudurka COVID-19.

**Xarumaha Deeganaanshaha ee Daryeelka:** Denver waxa ay xoojin doontaa kormeerka iyo taageerrada xarumaha daryeelka muddada dheer.

**Hooyga Haweenka oo Kaalmaati ah ku yaal Denver Coliseum:** Hoyga kaamaatiga ah ee haweenka ee cusub oo ku yaal Denver Coliseum, oo la furayo Abriil 20, ayaa hooy siin doontaa ilaa iyo 300 oo haween iyo shakhsiyaad transgender ah, iyaga oo bixin doona baaritaan, kala-soocid caafimaad, iyo helitaanka tasiilaadka nasashada oo loogu talagalay kuwa muujinaya astaamaha ama lagula taliyay in ay is karaantiilaan baahi caafimaad darteed.